Cilminafsi yaqaanka  wuxuu masuul ka yahay baaritaanka cilmnafsiga sida. caqliga uu wax ku qabsado macmiilka iyo ogaanshaha baahida caawinaadeed ee arimaha bulshada.

**Terabiyah jismiga** waxaa la xiriiri kartaa, marka macmiilka waxqabsigiisa- ama awoodiisa dhaqdhaqaaqa isbedel ku dhaco. Terabiyaha jismiga wuxuu horemariyaa sidii macmiilka keligiis wax u qabsan lahaa iyo awoodisa dhaqdhaaq iyo fududeeynta dhibaatada naafada, si qofku ugu noolaado nolol firfircoon, nolol isku filnaan iyo farxad nolomaalmeedkiisa. Terabiyaha jismiga wuxuu ka masuulyahay qiimeeynta dhaqdhaqaaqa iyo wax qabadka, terabiyada jismiga qorsheynteeda, qaban qaabinteeda iyo daba socodkeeda, qalabka caawinaaya dhaqdhaaqa iyo talo siinta iyo ku hagista deegaankiisa.

**Terabiyaha hadalka** waxaad la xiriiri kartaa markaad suaal ka qabto is dhex galka, isfahamka ama arimaha la xiriira cunto cunista. Terabiyaha hadalka wuxuu qiimeeynaayaa baahida baxnaaninada iyo masuuliyada qorsheynteeda, qaban qaabinteeda iyo daba socodkeeda. waxa kale oo terabiyaha hadalka hagaayaa dadka ugu dhow is dhexgalkooda iyo wada xiriirka, arimaha la xiriira cunto cunista iyo hadii loo baahdo hababka hadalka caawiya ama habka hadalka caawiya ee la iskufahmo (AAC) isticmaalkeeda.

**Terabiyada waxqabadka** waxaad la xiriiri kartaa, markuu macmiilka uga baahanyahay caawinaad gaara daryeelista naftiisa(dhar gashiga,cunto cunista), xalinta arimaha (adeegashada), iskuul dhigashada, ka qeyb qaadashada shaqada, qaadashada waqtiga firaaqada (sameenta wax xiiso leh)ama nasashada (waqti qaadashada, habka loo nafiso). Terabiyaha waxqabadka wuxuu masuul ka yahay qiimeynta baahida terabiyaha waxqabadka ee naafada horumarka garaadka, qalabka caawinada yar yar iyo wax ka bedelista guriga.  Waxa kale oo terabiyada wax qabadka qorsheeynayaa, qaban qaabinayaa iyo daba soconaayaa baxnaaninta oo ku hagaayaa  baxnaaninta waxqabsiga macmiilka qaraabadiis.

**Kala talinta galmada** waxaad la xiriiri kartaa, marka arin fakar ku geliso ama eey dhib ku heeyso muujinta dareenkaaga, ogaanshaha dareenada, xiriir la sameynta dadka iyo arimaha la xiriira xukumista xaaladaha is dhex galka, rabitaankaada galmo ama jirkaaga. Kala talinta galmada waxaad imaan kartaa keligaa, adoo wadata saaxiib ama qofka ku caawiya. Kala talinta galmada wexeey u dhaceeysaa hab wadasheekeysi kalsooni ku jirto.

**Koox shaqeedka caawinaadaha la xoojiyey** wexeey siinaayaan adeegyo dheeri ah macmiilka, xaaladiisa nololeed  adkaatay, oo caawimaadaha hada jira eeysan ku filneen. Koox shaqeedka waxaa ka mid ah xiriiriye, kalkaaliso cilminafsi iyo terabiyootiga wax qabadka, kuwaas oo wadajir caawinaad dheeriya u siinaaya macmiilka iyo qaraabadiis. Shaqada waxaa lagu hirgelin karaa tusaale ahaan guryaha, guryaha dadka lagu hayo, meelaha shaqo barista  iyo iskuulada.

Arimaha bulshada iyo caafimaadka
Adeegyada sooshalka ee qoysaska
Shaqada naafada
Poliklinikada naafada horumarka garaadka

*Somali - Luqadda soomaaliga*

*Ku soo dhawoow*

# POLIKLINIKADA NAAFADA HORUMARKA GARAADKA

*Macaamiilnimada*



*Sawir: Meri Laakso*

Arimaha bulshada iyo caafimaadka
Adeegyada sooshalka ee qoysaska
Shaqada naafada
Poliklinikada naafada horumarka garaadka

## Biloowga macaamiilnimada

Poliklinikada naafada horumarka garaadka waxaa uga timid magaalada Helsinki waraaqda macaamilnimada daryeelka naafada horumarka garaadka. Macmiilka waxaa lala sameeynayaa xiriir si loogu heshiiyo kulanka ugu horeeya meesha lagu kulmaayo xarunta ama booqasho guri. Kulanka ugu horeeya waxa la socda shaqaalaha soshalka deegaanka hadii loo baahdana qof ka tirsan koox shaqaaleedka Poliklinikada naafada horumarka garaadka (cilminafsi yaqaan ama terabiyaha). Micnaha waxaa weeye in la siiyo warbixinta macamiilnimada daryeelka gaarka ah, in la fiiriyo adeegyada hada jira iyo in la ogaada baahiyada adeegyo, sida adeegyada soshaalka iyo dhinaca baxnaaninta.

## Go, aanka macaamiilnimada

Hogaanka kooxda daryeelka gaarka ayaa ogolaanaaya go, aanka macamiilnimada. Go, aanka waxaa loo diraayaa macmiilka. Macaamiilnimada ka dib waxaa suurta galaaya in masuuliyada adeegyada iyo baxnaaninta poliklinikada naafada horumarka garaadka u wareegaan poliklinikada naafada horumarka garaadka. Adeegyada caafimaadka aasaasiga ah sida rugta la talinta caafimaadka (neuvola), iskuulada iyo daryeelka caafimaadka ardayda, adeegyada xarumaha caafimaadka iyo hadii loo baahdo ogolaanshaha daryeelka jirooyinka gaarka ah waxaa iska leh macaamiisha poliklinikada naafada horumarka garaadka. Poliklinikada naafada horumarka garaadka wexeey ku ekaaneeysaa adeegyaada la xiriira naafada horumarka garaadka.

## Poliklinikada naafada horumarka garaadka koox shaqeedkeeda baxnaaninta ee deegaaneed

Poliklinikada naafada horumarka garaadka  waxaa looga shaqeeya xirfado badan. Koox shaqadeedka baxnaaninta waxaa ku jiri kara, Poliklinikada naafada horumarka garaadka dhakhtaradooda, kalkaaliyayaashooda caafimaadka, cilminafsi yaqaan, terabiyahooda jismiga, terabiyahooda hadalka iyo terabiyahooda  waxqabadka. Koox shaqeedka wexeey u kulmaayaan marba baahida jirta ee macamiilka iyagoo wadashaqeyn la sameeynaaya shaqaalaha sooshalka adeegyada naafada. Ujeedada kulanka wuxuu noqon karaa diyaarinta qorshaha baxnaaninta ama hagis kale iyo talo siin. Hadii loo baahdo macmiilka isagaa la soo xiriiri kara kalkaalisada caafimaadka si uu balan uga qabsado.

## Diyaarinta qorshaha baxnaaninta

Qorshaha baxnaaninta waa qoraal soo jeedin ah, habka ugu wanaagsan ee macmiilka looga caawin karo awoodiisa waxqabsi ee nololmaalmeedkiisa. Qorsha waxaa lagu diyaariyaa kulanka koox shaqeedka ee lagu qaban qaabiyo poliklinikada naafada garaadka 1-3 sano markiiba.

**Kulanka koox shaqeedka ka hor** waxaa loo diraayaa macmiilka foomka warbixinada hore, taas oo lagu weeydiinaayo xaaladiisa hada iyo macmiilka/qaraabadiis wexeey rabaan iyo su,aalahooda. Macmiilka waxaa laga codsanaayaa inuu soo buuxiyo foomka  oo boosatada ugu soo celiyo Poliklinikada naafada horumarka garaadka  waqti hore inta uusan imaan Kulanka.  Macmiilka wuxuu kulanka ku casumi karaa ciduu rabo oo eey wadashaqeen leeyihiin tusaale ahaan macalinka, caawiyaha iyo terabiyaha baxnaanada. Hadii loo

sawir: Riitta Heikkinen



baahdo poliklinikada naafada xagga garaadka wexeey u qabaneeysaa wadahadalada turjubaan. Kulanka poliklinikada naafada horumarka garaadka ka hor waxaa xiriir lala sameeynaayaa teraabiyayaasha baxnaaninta iyo meelaha uu wax ku qabsado maalin walba (tusaale. iskuul waxqabad maalmeed) iyo hirgelinta qiimeeynta loo baahdo.

**Xarunta koox shaqeedka** waxaa lagu qiimeeynaayaa awooda waxqabsi ee macmiilka iyo jaanisyada uu uga qeybqaadan karo deegaankiisa iyo in la ogaado baahiyada gaarka ee u baahanyahay. Iyadoo laga duulaayo wadahadalkii waxaa la qeexaayaa ujeedooyinka baxnaaninta iyadoo lala kaashanaayo macmiilka. Isla markaasna waxaa lagu heshinaayaa noocyada caawinaadeed iyo terabiya ee ku aadan ujeedooyinka. Koox shaqeedka poliklinikada naafada horumara garaadka wexeey hadii loo baahdo talo bixin ka siinayaan habka dhaqan gelinta tusaale ahaan sida loo dalbado teraabiyada. Macmiilka waxaa mar labaad looga yeerayaa xarunta koox shaqeedka, waqti hore inta qorshaha baxnaaninta socda waqtigiisu dhicin.

## Adeegyada poliklinikada naafada horumarka garaadka

**Dhakhtarka** wuxuu qoraayaa warbixinada la xiriira daaweynta iyo baxnaaninta naafada horumarka garaadka, wuxuu kaloo baarayaa oo daaweynayaa jirooyinka la xiriira naafada horumarka garaadka (qalalka, dhimirka). Balanta la kulanka ama telefoonka dhakhtarka waxaad ka qabsaneeysaa kalkaalisada caafimaadka.

**Kalkaalisada caafimaadka** wexeey siineeysaa khibradeeda arima la xiriira naafanimada horumarka garaadka sida, hagis iyo talo siin iyo ineey u qabato balamada kulamada.

**Cilminafsi yaqaan** waxaad la xiriiri kartaa, markaad caawinaad uga baahtahay  qofka naafada horumarka garaadka ah hab dhaqankiisa, korintiisa, waxbarashadiisa ama baxnaanintiisa aad suaalo ka qabto.  Cilminagsi yaqaanku  wuxuu siinaayaa caawinaado wadahadal macmiilka iyo qaraabadiisa baahiyada la xiriira naafada horumarka garaadka.